DEPARTMENT OF HEALTH

# Cagaarshowga A

## Waa maxay cagaarshowga A?

Cagaashowga A waa infakshan beerka ku dhaca oo uu keeno faayraska cagaarshowga A.

## Waa maxay calaamadaha cagaarshowga A?

Dadka qaarkood waxaa lagu arkaa calaamado daran, laakiin qaar kalena wax calaamado ah laguma arko. Carruurta guud ahaan wax calaamado ah laguma arko.

Haddii ay jiraan calaamado, badanaaba si lama filaan ah ayey u bilowdaan oo waxaa ka mid ah xummad, daalid badan, cuntada oo laga go'o, iyo lallabo. Calaamadaha kale ee la arki karo dhowr maalmood ka dib waxaa ka mid ah kaadi madow (sida shaah ama kafee), saxaro aan midab lahayn, iyo indhaha ama maqaarka oo jaalle noqda (joondhis). Joondhiska calaamadihiisa aalaaba dadka waaweyn ayaa uga badan carruurta. Calaamaduhu dhowr usbuuc ayey qaadan karaan.

Cagaarshowga A ma noqdo infakshan (wakhti dheer) joogto ah.

## Waa maxay dhibaatooyinka cagaarshowga A?

Cagaarshowga A mararka qaarkood wuxuu keenaa infakshan weyn, oo daran, oo aan la fileyn (fulminant hepatitis). Dadka beerkoodu ku dhacay xanuunno kale ayaa arrintaas khatar ugu jira.

## Daawo miyuu leeyahay cagaarshowga A?

Ma jiraan daawooyin gaar ah oo lagula tacaalo cagaarshowga A.

## Sidee baa lagu ogaadaa cagaarshowga A?

Dhiigga in laga baaro ayaa lagu ogaan karaa haddii uu qof qabo cagaarshowga A.

## Sidee bay dadku isu qaadsiiyaan cagaarshowga A?

Cagaarshowga A sida la isku qaadsiiyo waa faayrus soo raaca saxarada qofka qaba cagaarshowga A.

Qofka la qaadsiinayo cagaarshowga A, faayruska ayaa afka u soo mara. Siyaabaha ugu badan ee la isugu gudbiyo waa:

- Cunidda ama cabidda cunto ama cabitaan wasakheysan.
- Isticmaalidda daroogada la isku mudo ama aan la isku mudin.
- Afka oo la geliyo waxyaabo wasakheysan.
- Marka galmada qaarkeed la sameynayo.

Carruurtu iyagoon calaamado lagu arkin ayey faayruskan u gudin karaan xubnaha qoyska ama dadka haya.

Qofka qaba cagaarshowga A waxa uu xanuunka ku sii gudbin karaa laba toddobaad ka hor inta aysan calaamado ku bilaaban iyo hal toddobaad ka dib xaaladda joondhiska. Haddii uu jiro qof aan joondhis lagu arkin, qofkaasi wuxuu dadka sii qaadsiin karaa xanuunkan laba toddobaad ka dib marka ay calaamaduhu ku bilowdaan.

Calaamaduhu waxay bilowdaan laba ilaa toddoba toddobaad ka dib (badanaa ilaa hal bil) ka dib marka qof la qaadsiiyo cagaarshowga A.

## Yuu ku dhacaa cagaarshowga A?

Qof kasta iyo da' kasta ayuu ku dhici karaa cagaarshowga A. Dadku badanaa ma oga marka infakshankan la qaadsiiyo.

Dadka ay ku badan tahay khatarta lagu qaadsiin karo cagaarshowga A waa:

- Qofkii isticmaala daroogada la isku mudo ama aan la isku mudin.
- Qofkii noqda darbiyajiif.
- Qofkii hadda xiran ama mar dhow xabsi la dhigay.
- Nimanka isu galmooda ama qoomuluudka ah (MSM).
- Qoyska uu la nool yahay qof infakshanka qaba.
- Qofkii ay isu galmoodaan qof infakshanka qaba.
- Qofkii u socdaala waddamo uu ku badan yahay cagaarshowga A.

## Tallaal miyuu leeyahay cagaarshowga A?

Haa, tallaalka cagaarshowga A waa mid lagula taliyo carruurta oo dhan markay da'doodu gaarto 12 bilood. Qof kasta oo gaaray ama ka weyn 12 bilood oo aan cagaarshowga A laga talaalin balse raba in uu helo difaacaas waa in uu qaato tallaalka. Dhakhtarka aad la xiriirto ayaa kugula talin kara in aad qaadato tallaalka haddii aad khatar ugu jirto in lagu qaadsiiyo cagaarshowga A.

Tallaal bilaash ah ama lacag yar la bixiyo ayaa loo hayaa carruurta iyo dadka waaweyn ee aan haysan ceymiska caafimaadka ama dadka uusan ceymiskoodu tallaalka ka bixineyn. Macluumaad dheeraad ah waxaad ka heleysaa barnaamijka tallaallada carruurta (Minnesota Vaccines for Children ama MnVFC) iyo barnaamijka dadka aan ceymiska haysan ama uusan ka bixineyn (Uninsured and Underinsured Adult Vaccine ama UUAV) ee Goobaha Tallaalka laga Qaato (www.health.state.mn.us/people/immunize/basics/vaxfinder.html).

## Maxaa la sameyn karaa si looga hortago in dadka kale la qaadsiiyo cagaarshowga A?

Tallaalka ayaa ah sida ugu fiican ee looga hortago in la is qaadsiiyo cagaarshowga A.

Gacmaha in la iska meyro musqusha marka laga soo baxo ka dib, marka xafaayad la beddelo ka dib, iyo ka hor intaan la bilaabin karinta ama cunidda cuntada ayaa ah sida looga hortago cagaarshowga A.

## Maxaan sameeyaa haddii la i qaadsiiyo cagaarshowga A?

Kala hadal dhakhatarka aad la xiriirto in lagaa baaro haddii aad u maleyneyso in lagu qaadsiiyey cagaarshowga A.

Dadka caafimaadka qaba ee ay da'doodu gaarto ama ka weyn 12 bilood, tallaalka cagaarshowga A ayaa la siin karaa si looga joojiyo in ay ku bilowdaan calaamadaha dadka xanuunka la qaadsiiyo labadii toddobaad ee ugu dambeeyey.

Waxa ay ku xiran tahay hadba dhakhtarku siduu u qiimeeyo khatarta jirta, laakiin dadka ay da'doodu ka weyn tahay 40 jir waxa kale oo la siin karaa wax la yiraahdo immune globulin (IG) iyadoo isku mar la siinayo tallaalka cagaarshowga A.

Carruurta ka yar 12 bilood, waxaa la siin karaa immune globulin (IG) haddii xanuunka la qaadsiiyey labadii toddobaad ee ugu dambeeyey.

Hepatitis Unit
PO Box 64975
St. Paul, MN 55164-0975
651-201-5414 ama 877-676-5414
www.health.state.mn.us/hepatitis

6/26/2019 - Hepatitis A (Somali)

*Si aad macluumaadkan ugu hesho hab kale, soo garaac: 651-201-5414.*